OREGON DEPARTMENT OF
**Human Services**
Developmental Disabilities Services

Farriintan waxaa la soo galiyay onlaynka iyadoo ku qoran af اللغة العربية, English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文 iyo Tiếng Việt.

**Sibtambar 3, 2025**

**Ku socota**: Xubnaha bulshada I/DD iyo shaqaalaha ODDS

**Ka socoto:** Jeff Akin, Agaasimaha Kumeelgaarka ah, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (Office of Developmental Disabilities Services, ODDS)

## Mawduuca: Wixii ka soo kordhay kala-guurka shati-siinta iyo shahaado-siinta daryeelka xannaanaynta ee shakhsiyaadka iyo qoysaska

Ma nabad baa,

Farriintani waxaa loogu talagalay

- Shakhsiyaadka hela adeegyada naafooyinka garasho iyo koboceed ee Oregon, gaar ahaan kuwa hela daryeelka xanaanaynta, iyo
- qoysaskooda.

Fadlan ogow: **Isbeddelkan saamayn maayo nooca adeegyada aad hesho.**

Waxaan macluumaadkan u soo dirayaa, inaan jecelahay wada-xiriirka furan dartii. Wixii isbeddel ah, waa caadi inaad ka qabto su’aalo ama

walaacyo. Farriin aqbaareedkaani waxay sharrixi doontaa kala-guurka soo socda.

Waxaan u soo koobayaa shuraakada soo socda si ay ula socdaan arrinta.:

- Barnaamijyada naafooyinka koboceed ee bulshada (CDDP)
- Bixiyayaasha wakaaladda iyo daryeelka xannaanaynta
- Dallaaliinta
- Guddida Talobixinta Aragtida
- Shaqaalaha ODDS.

## Maxaa iska beddelaya daryeelka xanaanaynta ee naafooyinka garasheed iyo koboceed?

Wakhtigan la joogo, CDDPs waxay shati iyo shahaado siisaa guryaha xannaanaynta marka la eego ODDS. Shaqadan waxa ku jira guryaha xannaanaynta carruurta iyo dadka waawayn. CDDPs waxay qabataa waxyaalaha soo socda:

- Waxay maaraysaa codsiyada guryaha xannaanaynta
- Waxay hubisaa in guryaha shaqeeyaa ay shuruudaha buuxiyeen ayna raacaan siyaasadaha iyo xeerarka Oregon
- Waxay kormeeraan guryaha xannaanaynta.

Janaayo 1, 2026, ODDS ayaa hawlahan la wareegi doonta. CDDPs qaban mayso hawlahan markaa wixii ka dambeeya. Qaybta Shati-bixinta ODDS ayaa qaban doonta.

## Waxaan degganahay guri xannaanayn. Miyey adeegyadaydu isbeddeli doonaan?

Maya. Waxba iska beddeli maayaan sida aad adeegyada u hesho.

Adeegyadaada daryeelka xannaanayntu sidooda ayay iska ahaan doonaan. Adeegyadaada maaraynta kiisku sidooda ayay iska ahaan doonaan. Sida aad cabasho u samayso sidiisa ayuu iska ahaan doonaa.

Isbeddelku wuxuu saamayn doonaa cidda shatiga iyo shahaadada siisa gurigaaga xannaanaynta. Wakhtigan la joogo, shaqaale ka socdo CDDPs ayaa shaqadan qaban doono. Sanadka xiga, shaqaale ka socdo ODDS ayaa qaban doono shaqooyinkan. Xubnaha shaqaalaha ee soo booqda gurigaaga xannaanaynta si ay u sameeyaan qiimaynta shati-bixinta ayaa isbeddeli kara.

## Waa maxay sababta ODDS u samaynayso isbeddelkan?

Isbeddelkan waxa u baahan miisaaniyadda 2025-27 ee Sharci-dejintu ansixisay.

Sharci-dejinta Oregon waxay sharciyada u dejiyaan guryaha xannaanaynta. ODDS waxay hubiyaan in bixiyayaasha xannaanayntu ay buuxiyeen shuruudaha sharcigana raacaan.

Sharci-dejintu sidoo kale waxay dejisaa miisaaniyadda gobolka. Waxaana ka mid ah miisaaniyadda ODDS iyo daryeelka xannaanaynta.

Kahor inta Sharci-dejinta aysan dejin miisaanad kasta, barnaamijyadu waxay soo jeediyaan maalgashiyo iyo kayd suurtagal ah. Miisaaniyaddu waxay isku dheellitirtaa maalgalinaha iyo dhimitaanada. Iyadaa hannaankaas la raacayo, go’aanada miisaaniyadda Sharci-dejintu waxay beddeli karaan sidaan u hawlgalno.

Sanadkan, ODDS waxay siisay ikhtiyaaro badan Sharci-dejinta. Hal ikhtiyaar wuxuu ahaa in la iskugu geeyo shaqooyinka shati-bixinta xannaanaynta ODDS. Sharci-dejintu waxay qaadatay ikhtiyaarkan. Sidaas darteed, miisaaniyadda 2025-27 ee Oregon waxay uga baahan tahay ODDS inay samayso isbeddelkan.

## Waa maxay faa'idooyinka in ODDS qabato shaqada shati-bixinta daryeelka xannaanaynta?

Isbeddelku wuxuu keenayaa dhawr faa'ido oo muhiim ah. Wakaaladdeena oo dhan, waxaanu ku hawlannahay horumarinta tayada iyo badbaadada adeegyadeena. Koox shati-bixin dhexe oo joogto ODDS ayaa taageeri doonto:

- Hanaanno isku mid ah oo laga hirgeliyo gobolka oo dhan
- Wada-xiriir cad oo midaysan
- Xallinta dhibaatooyinka si dhakhso ah
- Isla xisaabtan la adkeeyey.

Nidaamka kakanaanta badan ee hadda aynu haysano sidoo kale waa kharash badan yahay.

Waxaynu qaban doonaa shaqadii fiicnayd ee CDDPs qaban jirtay mid la mid ah. Marba marka ka dambaysa, isbeddeladani waa inay horumariyaan adeegyadaada daryeelka xannaanaynta. Qaybta Shati-bixinta ODDS waxay ka caawin dontaa guryaha xannaanaynta inay badbaado qabaan oo buuxiyaan jaangoynaha loo dhigay inay ku ilaaliyaan.

## Sideen intaan wax ka badan u ogaan karaa?

Si aad wax badan uga ogaato kala-guurka shati-bixinta xannaanaynta, ka soo qaybgal Wada-sheekaysigeena Bulshada ee Oktoobar 1. Waa kulan onlayn ah oo Zoom ka dhacaya. Shaqaalaha ODDS ayaa ka jawaabi doona su'aalahaaga, jawaabcelintaadana dhagaysan.

### Waa kan faahfaahinta kulanku:

- **Ku saabsan:** Wada-sheekaysiga Bulshada ODDS

- **Mawduuca:** Kala-guurka shati-bixinta daryeelka xannaanaynta ODDS
- **Taariikhda:** Oktoobar 1, 2025
- **Waqtiga:** Duhurka ilaa 1 g.d.
- **Sida loo xaadirayo:** Isticmaal linkigan si aad shirka ugu biirto. Uma baahnid inaad isdiiwaangeliso.

Waxaanu kugu martiqaadi inaad soo dirto su'aalahaaga ama jawaabcelintaada xilli hore. Fadlan isticmaal foomkan. Waxaad ku buuxin kartaa Ingiriisi, Isbaanish, Carabi, Ruush, Shiinayska Casriga ah, Soomaali, iyo Fiidnaamiis. Fadlan gudbi foomka ugu dambayn 8 g.h. ee Sibtambar 29.

Khasab kuguma aha inaad buuxiso foomka si aad kulanka uga qaybgasho. Waad waydiin kartaa su'aalahaaga muddada kulanku socdo.

Haddii aanan ka jawaabi karin su'aalahaaga wakhtiga kulanku socdo, xubin shaqaalaha ka tiran ayaa iimeyl ahaan kuuga soo jawaabi doona. Haddaad rabto asturnaan/xog-dhawris, waxaad sidoo kale noo sheegi kartaa inaanu iimeyl ahaan kuugu soo jawaabno.

Waxaanu doonaynaa in qof walba uu dareemo soodhaweyn iyo badqab. Taageero bilaash ah ayaanu ku siin doonaa si aad uga qaybqaadato. Tani waxaa ka mid ah:

- Luuqadda Farahadalka Mareekanka
- Turjubaan Isbaanish
- Qoraal-hoosaad toos ah
- Marka la eego luuqadaha ama taageerooyinka kale, wac 503-945-5811 ama iimeyl u dir ODDS.Questions@odhs.oregon.gov. Fadlan sidan samee ugu dambayn Sibtambar 26.

## Tallaabooyinka xiga

Waxaad ka baran kartaa wax badan oo ku saabsan kala-guurka websaytkeena.

Haddaad su'aalo qabto, waxaad iimeyl u diri kartaa hoggaanka mashruuca, Laura Copeland.

Waxaan kuu soo diri doonaa wacaal kale qiyaastii Janaayo 1 marka isbeddelkan dhacayo.

Nabadgelyo,



Jeff Akin
Agaasimaha Ku meelgaarka ah, Xafiiska Adeegyada Naafooyinka Koboceed
Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (Oregon Department of Human Services)

---

## Khayraadka

- Isku diiwaangeli warbixinnada ODDS.
- Wax ka ogow dhacdooyinka ODDS.
- Isku diiwaangeli warbixinnada Adeegyada Aadanaha ee Oregon.
- Akhri farriimo ka socdo ODDS.
- Naga soo raac Facebook @oregonDHS.IDD.

Dokumeentigan waxaad ku heli kartaa luuqado kale, far waaweyn, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidaysid. Iimeyl ku dir dd.directorsoffice@odhsoha.oregon.gov ama wac 503-945-5811. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalku ku adag yahay.